



Asker
kommune

Macluumaad ku socda waalidiinta iyo shaqaalaha kale ee ku saabsan caabuqa Covid-19 ee iskuulka ama xannaanada

Infekshanka covid-19 ayaa laga helay iskuulka ama xannaanada ilmahaaga. Adiga ama ilmahaagu lama qeexin inaa tihiin kuwa la leh xirriir dhow dadka laga helay, sidaa darteed ilmaahaga wu imaan karaa sida caadiga ah, haddii aadan macluumaad kale aadan ka helin iskuulka ama xannaanada.

Dhakhtarka dowlada hoose ayaa si dhow ula socdo xaaladda iyagoo kaashanaya machadka qaranka ee caafimaadka dadweynaha.

Astaamaha suurtoogalka ah ee Covid-19

Astaamaha Covid-19 waxaa ka mid noqon kara qufac, qandho, neefta oo ku qabata, dhadhanka iyo urta oo yaraata, madax xanuun, caajis iyo murqo xanuun. Xanuunka caloosha ayaa sidoo kale kugo dhici kara. Gaar ahaan carruurta, astaamaha covid-19 waxay noqon karaan kuwo khafiif ah oo ay adag tahay in laga sooco cudurrada kale ee neef-mareenka.

Haddii calaamadahani ay dhacaan, waa inaad ballan ka samaysataan baaritanka koronaha.

Baaritaan

Qof kasta oo leh astaamo cusub sida kor lagu sharaxay ama xirriir dhow la yeeshay qof cudurka qaba waa in la baaro. FHI (wasaarada caafimaadka dadweynaha) waxay kaloo ku talinaysaa in la baaro carruurta, maadaama la helay baaritaano oo carruurta u fican oo dhibayn.

Halkaan ka dalbo hab digital ahaan baaritaanka:

<https://www.helseboka.app/booking/staff/66171>

Haddii aadan lahayn BankID, ama aadan deggaan Asker ku ahayn, waxaad wici kartaa taleefanka koronaha: 66 71 59 99 si aad ballan u qabsato. Taleefanka wuxuu furan yahay saacadaha: kl. 08:30-15:15 maalin kasta, oo ay ku jiraan maalmaha fasaxa.

Ma qabta su'aalo?

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan karantiilid, baaritaan ama caabuq, waxaad wici kartaa taleefanka koronaha 66 71 59 99. weydiiso turjumaan haddii aad u baahan tahay macluumaad ku qoran luqado kale.

Haddii ay dhacdo in cudurka si weyn u dillaaco, macluumaad cusub ayaa ka imaan doona dhaktarka dowladda hoose. Kiisaska gaarka ah ee caabuqa, oo aan

saamaynayn hawlgallada caadiga ah ama karantiilid ardayda iyo macallimiinta, wax macluumaad dheeraad ah looma diri doono dadweynaha.

Xusuusnow in qofna uusan imaan dugsiga ama xannaanada marka uu xannuunsan yahay.

La xirriir dugsiga ama xannaanada haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Salaan wanaagsan,
Dhaktarka dowlada hoose Meera Grepp